

DANISH HEALTH AUTHORITY

# Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada

## Tallalku waxa uu kahortagaa cudurka

Health for all

# Tusmooyinka

**4 Tallaalka Carruurta**
6 Goormaan ilmahayaga tallaalayaa?

8 Q&A(SUAALO IYO JAWAABO) ku saabsan tallaalka

**11 Tallaalkee ayuu ilmahaygu haysanayaa?**
11 Tallaalka ku lidka ah gowracatada, teetanada, xiiqdheerta, dabaysha iyo bakteeriyada Hib

14 Tallaalka ku lidka ah cudurka oofta

15 Tallaalka kahortaga jadeecada, qanjo bararka iyo jadeeca jarmalka (tallaalka MMR)

18 Tallaalka ku lidka ah kansarka ilma galeenka, kansarka malawadka iyo burooyinka xubinta taranka guudkeeda/korkeeda (Tallaalka HPV)

**20 Hel macluumaad dheerad ah**

# Tallaalka Carruurta

Gudaha Denmark dhamaman carruurta waxaa la siiyaa tallaalka kahortaga cudurada caabuqyada ee kala duwan. Suuragal ahaan waa cuduro khatar ah oo sababi kara jiro daran. Xaaladaha ugu xun xataa waxay keenaan dhimasho. Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada ee Danish waxa uu jiray laga bilaabo 1943.

Marka ilmahaagu raaco barnaamijka tallaalka waxaa si wanaagsan looga ilaaliyaa khataraha cudurka, sida jadeecada, dabaysha iyo xiiqdheerta.

## Sababtee carruurta loo siyaa tallaalka?

Marka aanu tallaalno carruurta waxaa laga ilaaliyaa jirada daran oo waxay ka caawisaa ilaalinta kuwa ag jooga siiba.

Badanka cudurada aanu ka tallaalno badanka waa laga dabar jaray gudaha Denmark – sababaha ugu muhiimsan waa in ay caruur badan yihiin kuwo la tallaalay. Marka tiro badan oo dad ah la tallaalo, way ku adagtahay cuduradan in ay faafaan. Cuduradan weli waxay ka jiraan wadamo badan oo waxay ku noqon karaan Denmark haddii aanaan sii wadin inaan tallaalno. Gudaha Denmbark dhamaman carruurta waxaa la siiyaa tallaalo ku lid ah cudurada caabuqa ee badan. Suuragal ahaan waa cuduro khatar ah oo sababi kara jiro daran. Xaaladaha ugu xun xataa waxay keenaan dhimasho.

Ilmahaaga waxaa la siin doonaa tallaalka koowaad da'da 3 bilood tallaalka u dambeeyana waxaa la siin doonaa markay gaadhaan 12 sano jir.

Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada waa si mutadawac ah oo waxa uu bilaash u yahay dhammaan carruurta. Waalid ahaan, waxaad warqad ku helaysaa Boosta Dhijitaalka ah marka ay tahay wakhtiga ilmahaaga la tallaalayo. Waa inaad markaas ka qabsataa ballanta tallaalka dhakhtarkaaga.



# Goormaan ilmahayaga tallaalayaa?

Halkan waxaad ku arki kartaa kuwa ayyihiintallaalka Masuuliyiinta Caafimaadka Danish ku taliyaan iyo waqtiga ay tahay in ilmahaagu qaato tallaalada kala duwan. Waa muhiim in ilmahaaga la tallaalo sida ugu dhowee suuragalka ah wakhtiga lagu taliyay. Ilmaha waxaa badanaa la tallaalaa marka la marsiiyo baadhitaanka guud xaga dhakhtarka guud.



## 3 bilood

Tallaalka ku lidka ah gowracatada, teetanada, kixda, dabaysha, bakteeriyada Hib + cudurka oof wareenka.

## 5 bilood

Tallaalka ku lidka ah gowracatada, teetanada, kixda, dabaysha, bakteeriyada Hib + cudurka oof wareenka.

☑ **Baadhitaanka**

## 12 bilood

Tallaalka ku lidka ah gowracatada, teetanada, kixda, dabaysha, bakteeriyada Hib + cudurka oof wareenka.

☑ **Baadhitaanka**

## 15 bilood

Tallaalka MMR ee ku lidka jadeecada, qanjo bararka iyo jadeeca jarmalka.



## 4 sanadood

Tallaalka MMR ee ku lidka jadeecada, qanjo bararka iyo jadeeca jarmalka.

☑ **Baadhitaanka**



## 5 sanadood

Tallaalka xoojinta ah ee kahortaga gowracatadda, teetanada, xiiqdheerta iyo dabaysha

☑ **Baadhitaanka**



## 12 sanadood

Tallaalka HPV ee kahortaga kansarka ilma galeenka, kansarka futada iyo burooyinka xubinta taranka guudkeeda (labba jeer)

## Q&A(SUAALO IYO JAWAABO) ku saabsan tallaalka

*Waa maxay saamaynta ee la filayo ka dib tallaalka?*

Tallaalka, sida dawada, waxa uu sababi karaa saamayn . Badanka carruurta, saamaynaha ay kala kulmaan badanka waxay noqon doonaan kuwo aan khatar badan lahayn si degdeg ahna u baaba'o markale. Saamaynaha ugu badan ee waxay keeni karaa n qandho, barar, guduud iyo jileeca ku hareeraysan aaga mudditaanka. Sidoo kale waa wax caadi ah in qaybo carruurta ah ay noqodaan kuwo xanaaq dhoe, lulmooda, u seexda si aan caadi ahayn, mantaga, shubmaya ama cunto rabitaanka oo yaraada. Saamaynahan si degdeg ah ayay u qarsoomi doonaan mar labbaad.

Falcelinta xasaasiyada waa kuwa dhif ah. Xaaladaha dhifta ah, qayb kuus ah ayaa ka soo baxda hoosta maqaarka halka laga siiyay mudditaanka. Waxa jiri karta cuncun iyo fin. Tani waxaa sababa fal celinta nidaamka difaaca jidhka. Waxyeelo ma laha oo waa uu qarsoomi doonaa.

Gaar ahaan tallaalka MMR, taasoo ilmahu helo da'da 15 bilood iyo 4 sanadood, si la xidhiidha, waxaa jiri kara, mid ilaa labba todobaad ka dib tallaalka, inay noqdaan astaamaha si degen ula midka ah jadeecada, qanjo bararka iyo jadeeco jarmalka, kuwaas oo ah cudurada ilmaha laga tallaalo. Tan waxaa sababa tallaalka ka kooban fayraska nool, itaal daraysay ee sababi karta astaamaha aan khatarta lahayn ee la midka ah kuwan ay sababaan fayraska dabiiciga ah.

*Suuragal ma tahay in dib loo dhigo tallaalka, tusaale ahaan xaalada jirada?*

Waa lama huraan in ilmahaagu helo tallaalka ku dhow wakhtiga lagu taliyay ee suuragalka ah. Tani waxay bixisaa kahortaga ugu wanaagsan. Tani gaar ahaan waxay ku habboon tahay tallaalka la siiyay carruurta yaryar ee 3, 5, iyo 12 bilood oo da'da ah si looga ilaaliyo cudurada sida xiiqdheerta, taas oo ilmaha aan la tallaalin ay aad u jiranaan karaan da' kasta..

Waxay noqon kartaa lama huraan in dib loo dhigo tallaalka, tusaale ahaan, haddii ilmahaagu uu jiran yahay oo uu qandho qabo. Si kastaba ha ahaatee, waa suuragal ah ilmahaagu in la tallaalo haddii ay qabaan hargabka. La hadal dhakhtarkaaga, kuwaas oo kugu caawin kara qiimaynta haddii tallaalka ilmahaaga dib loo dhigayo.

*Bal ka waran haddii ilmahaygu seego tallaalka?*

Haddii ilmahaagu uu seegay tallaalka, waa inaad la hadashaa dhakhtarkaaga haddii tallaalka la dhammaystiri karo. Waxaad ogaan kartaa ka uu yahay tallaalka ilmahaaga la siiyay iyo marka ay u baahdaan in la tallaalo websaydka soo socda sundhed.dk.

### *Sidee tallaalku u shaqeeyaa?*

Tallaalku waxa uu xaqiijinayaa in nidaamka difaaca jidhka uu gaadho qayb aan firfircoonayn ama itaal daran ee fayraska iyo bakteeriyada (antijiinka) aan sababi karin cudurka. Si kastaba ha ahaatee, antijiinku waa uu kicin doonaa nidaamka difaaca si looga jawaabo sida ay u ahayd fayraska dhabta ah iyo qadarka difaaca sida antibodhiyada. Natiijo ahaan, ilmahaaga waxa dhici karta, tusaale ahaan, inay ku dhacdo qandho degen.

Nidaamka difaacu markaa waxa uu xasuusan karaa tan haddii ilmahu marka dambe ay soo gaadho fayraska ama bakteeriyada ku lidka ah taasoo laga tallaalay. Nidaamka difaacu waxa uu aqoonsadaa oo dilaa fayraska ama bakteeriyada, iyo ilmahuna sidaas awgeed ma bukoodo. Kartida nidaamka difaaca si loo xasuusta tallaalka kala duwan inuu kala duwan yahay. Sidaas awgeed, qaar ka mid ah tallaalka waa in lagu celiyaa dhowr sanadood ka dib -- tani waxay ku habboon tahay, tusaale ahaan, teetanada iyo gowracatada.

### *Halkee jidhka ilmahayga ah ayaa laga siinaayaa tallaalka?*

Dhakhtarku caadi ahaan waxa uu ka tallaali doonaa carruurta yaryar bowdada oo carruurta waa wayna cududa gacanta ee sare. In kastoo, ay kala duwan tahay iyadodo ku xidhan tallaalka gaarka ah iyo qiimaynta dhakhtarka.

# Tallaalkee ilmahaygu u baahan yahay inuu qaato?

## Tallaalka ku lidka ah gowracatada, teetanada, xiiqdheerta, dabaysha iyo bakteeriyada Hib

Tallaalka ku lidka ah cudur waxaa loo siiyaa sidii hal mudditaan keliya. Tallaalka waxaa la bixiyaa wakhti isku mid ah oo ku lid ah cudurka oof wareenka, kaas oo sidoo kale hal mudditaan keli ah. Labba mudditaanka ee uu dhakhtarku ku bixiyo aagag kala duwan ee jidhka ilmaha ah, caadi ahaan dibada bowdo kasta.

### Goorma?

Ilmahaaga waxaa laga tallaali doonaa gowracatada, teetanada, xiiqdheerta, dabaysha iyo bakteeriyada Hib da'da **3, 5 iyo 12 bilood.**

Marka ilmahaagu uu yahay **5 sanadood** jir, isaga ama iyaddu waxaa laga tallaalayaa gowracatada, teetanada, xiiqdheerta iyo dabaysha.

## Gowracatada

Gowracatadu waa cudurk ku dhaca neefmareenka kaas oo ku faafa lagunagudbiyo dhibcaha sida qufaca iyo hindhisada. Gowracatadu waxa uu sababaa boogta daran ee hunguriga, ee ah xaaladaha ugu xun, waxay noqon kartaa mid nolosha khatar gelinaysa ilmaha.

## Teenada

Teetanada waxaa sababa bakteeriyada laga helo camuuda/ciida oo waxayna jirka ka soo gashaa dhexda dhaawaca, iyo meelo kale. Teetanada waxay sababtaa adkaanshaha muruqa iyo suuxdinta, taas oo, xaaladaha daran, sababi kara waxyeelada dhaawaca ama noqda mid khatar ah.

## xiiqdheerta (xiiqda)

xiiqdheertu waa cudurka sare ee faafa ee ku samaysma weerarka qufavca daran ee muddo dheeraada. Weerarka qufacu waxa uu daaliya ailma kasta oo waxaa dhici karta, xaaladaha ugu xun, waxa uu sababaa yaraanshaha neefta. Xaaladaha dhifka ah ee xiiqdheerta waxay noqon kartaa mid nolosha khatar gelisa dhalalanka weli la tallaalayo.

## dabaysha (faaliga dhallaanka)

Dabaysha waa caabuqa fayraska daran ee nidaamka neerfaha, kaas oo ay dhici karto, ugu daraan, waxa uu sababaa faaliga ku meel gaadhka ah oo waxa uu noqon karaa mid nolsha khatar gelinaysa ilmaha haddii ilmaha neefsashadiisa waxa uu noqdaa mid faalig ku dhaco.

## Maaninjaytiska iyo cudurada kale ee daran ee ay sababto bakteeriyada Hib

Hib (Haemophilus ihargabka nooca b) waa bakteeriya in, gaar ahaan carruurta da'da yaryar, waxay sababi karaan cuduro khatar ah iyo suuragal ahaan cudurada suuragal ahaanshaha khatar gelinaya sida mayninjaytiska (ololka xuubka ilaalinta ku xeeran maskaxda iyo xangulaha) iyo boogta hunguri xanuunka.

Maninjaytis (ololka xuubka ilaalinta ah ee ku xeeran maskaxda iyo xangulaha) oo ay sababto bakteeriyada Hib sidoo kale waxay sababi karaan dhaawacyada joogtada ah, sida liidashada maqalka ama waxyeelada maskaxda. Mida ugu xun, waxay noqon kartaa mid dhimasho keenta. Iyaddoo la xidhiidha hunguri xanuunka daran, ilmahu waxa ay dhib ka haysan karaan neefsasahda iyo, xaaladaha ugu xun, marinka hawada ilmaha waxaa dhici karta in uu xanibmo iyaddoo uu sababo bbararku.



## Tallaalka ku lidka ah cudurka oofta

Tallaalka kahortaga cudurka oofwareenka waxaa la bixiyaa isku wakhti marka tallaalka ku lidka ah gowracatada, teetanada, kixda, dabaysha iyo bakteeriyada Hib. Dhakhtarku waxa uu bixiyaa labba mudditaan oo ah meelo kala duwan guudka jidhka ilmaha – caadi ahaan dibada bowdo kasta.

### Goorma?

Tallaalka kahortaga cudurka oof wareenka waxaa la bixiyaa marka ilmahaagu uu yahay da'da **3, 5 iyo 12 bilood**

Bakteeriyada oofwareenka waxay keentaa caabuqa dhegta ee dhexe (dhegta dhexe) iyo caabuqa sanka (caabuq san), kaas oo dhif ahaan khatar ah. Haddii bakteerayadu ku faafto xididada dhiiga, waxaa dhici karta, dhowr xaaladood, inay sababto jiro daran, sida maaninjaytiska (ololka xuubka ilaalinta ku xeeran maskaxda iyo xangulaha) ama sumowga dhiiga, kaas oo, xaalado dhif ah, noqon kara mid nolosha ilmaha khatar gelin kara. Tallaalku sidoo kale waxa uu ka ilaaliyaa waayeelka iyo dadka nugul, ee khatarta sare ugu jira jirada uu sababo bakteeriyada oof wareenka.

## Tallaalka kahortaga jadeecada, qanjo bararka iyo jadeeca jarmalka (tallaalka MMR)

### Goorma?

Tallaalkaaga kahortaga jadeecada, qanjo bararka iyo jadeeca jarmalka, sidoo kale loogu yeedho tallaalka MMR, waxaa la siiyaa marka ilmahu uu yahay da'da **15 bilood iyo 4 sanadood**

## Jadeecada

Jadeecadu waa cudur si aad ah u faafa, kaas oo, xaaladaha dhifka ah, noqon kara mid khatar ah iyo, tusaale ahaan, keena maaninjaytis (ololka xuubka ilaalinta ku xeeran maskaxda iyo xangulaha), ee sababi karta waxyeelada maskaxda ee jootada ah, dhego la'aanta iyo waxay noqotaa mid dhimasho keenta xaaladaha ugu xun.

Ka hor helitaanka tallaalka badanka carruurta joogta Denmark waxay la jiraadeen jadeecada. Jadeecadu waxay si xusid mudan u noqotay mid dhif ku ah gudaha Denmarka; si kastaba ha ahaatee, waxay sii socotaa inay noqoto mid guuda dhowr wadamada Yurubta ah iyo kuwa aan Yuribiyaanka ahayn.

Dadka waa wayn ee dahwaan ay saamaysay ama laga tallaalay jadeecada waxay u qalmaan tallaalka bilaashka ah.

## Qanjo Xanuunka

Qanja bararka waxaa sababa fayraska sababa ololka iyo bararka qanjidhka candhuufta, qandho yar iyo dareenka raaxo daro. Xaaladaha dhifka ah, fayraska waxa uu keenaa maaninjaytis (ololka xuubka ilaalinta ee ku xeeran maskaxda iyo xangulaha), kaas oo ay dhici karto, ugu xumaan, inuu dhimasho keeno.

Qanjo xanuunku wax auu sababaa ololka xiniinyaha ee wiilashada muddada ama ka dib qaan gaadhka. Tani waxay keeni kartaa yaraanshaha soo saarida shahwada oo ku meel gaadh ah ama joogta ah, oo yarayn karta kartida in carruur la dhalo.

## Jadeeca Jarmalka

Jadeeca jarmalka waxaa sababa fayras caadi ahaan lagu sifeeyo jirada degen ee carruurta qabta qandahada yar, astaamaha hargabka guud iyo finanka guduudan. Waxaanu carruurta ka tallaalnaa jadeeco jarmalka si looga hortaggo iyada inay qaadaan cudurka oo ay qaadsiiyaan haweenka uurka leh. Haddii haweenay uur leh ay ku dhacdo jadeeca jarmalka nuska hore ee uurkeeda, waxaa jirta khatarta si xun u samaysanka uurjiifka.

Haweenka da'da uur qaadka ah sidoo kale waxaa lagaga tallaalaa jadeeco jarmalka bilaash haddi aanu hadda ka hor ku dhicin cudurku ama aan la tallaalin.

Jadeeca jarmalku in dheeraad ah kama dhacdo gudaha Denmark.

## Tallaalka ku lidka ah kansarka ilma galeenka, kansarka malawadka iyo burooyinka xubinta taranka guudkeeda/korkeeda (Tallaalka HPV)

### Goorma?

Tallaalka HPV waxaa lagula talinayaa labbadaba wiilasha iyo gabdhaha da'da **12 sanadood.**

Ilmahu waa inuu qaataa 2 tallaal ah oo wakhti ukala dhexeeyo ugu yaraan 5 bilood iyo ugu badnaan 13 bilood.

Haddii wakhti ukala dhexeeya aan la arkin, ama haddii ilmahu uu gaadhay da'da 15 sanadood ka hor mudditaanka koowaad, wadarta 3 tallaalka ah waa in la siiyaa.

HPV waa fayraska muhim ahaan la isugu gudbiyo taabashada galmada. Tallaalka sidaas awgeed sida la doorbidayo waa in la siiyaa kahor bilowga galmada. Caabuqa leh HPV waa mid ku badan, gaar ahaan dadka dhalin yarta ah. Inta badan, dadka aan lahayn astaamaha, iyo, badanka xaaladaha, caabiqa HPV iskeed ayuu u tagaa. Dadka qaar, si kastaba ha ahaatee, fayrasku ma faafo oo waxa uu keeni karaa isbeddelada nudaha oo sababa kansarka sanado badan ka dib. Qaar ah noocyada HPV waxay sababaan burooyinka xubinta taranka, marka nooyada kale ay sababaan kansarka ilma galeenka ama noocyada dhifka ah ee kanarka, sida kansarka malawadka.

Waxaa jira noocyo badan oo HPV oo sababa caabuqa. Tallaalku waxa uu ka ilaaliyaa noocyada HPV ee sababa badanka xaaladaha keena kansarka.

# Hel macluumaad dheerad ah

Akhri wax badan oo ku saabsan Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada Dheeniska iyo cudurada ku lidka ah ee aanu ka tallaalno ee ku jira websaydka Masuuliyiinta Caafimaadka Dheeniska:
**www.sst.dk/da/boernevaccination**

**Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada Danish**
**waxa uu bixiyaa kahortaga**
daabacaada 13naad

© Sundhedsstyrelsen, 2022

Electronic ISBN: 978-87-7014-056-0
ISBN nooca daabacan: 978-87-7014-057-7

Ka dalbo
Stibo Complete
T +45 43227300
www.stibocomplete.com/webshop
Daabacaado waa bilaasha, laakiin waxaad u baahan tahay inaad bixiso lacagta boostadda.

Daabacaada sidoo kale waxaa laga heli karaa www.sst.dk

Health for all